

SIDA LOO SIIYO NALOXONE

Saaxiibkaaga waxaa laga yaabaa inuu iska tan badinayo opioid-yo haddii uusan kici karin, uusan si caadi ah u neefsanaynin, ama maqaarkiisa isu beddelayo buluug ama cawl. Haddii aad u malaynayso saaxiibkaaga inuu iska tan badinayo, wac 911. (Gobolka Washington wuxuu leeyahay Good Samaritan laws (Shuruucda Samatabixinta Wanaagsan) si looga ilaaliyo labadiina in la idiin maxkamadeeyo haysashada daroogada.) Kadib saaxiibkaaga jiifi, oo sii naloxone oo neefta badbaadi. Marka saaxiibkaaga uu bilaabo inuu dib u neefsado, u gedi dhinaciisa.

1. Fur baakada

Ha tijaabin buufinta. Qasacadda waxaa ku jira kaliya hal kuuro.



2. U qabo qasacadda sidaan oo kale

3. Afka u gali midkood duleelada sankaa

Farahaaga waa inay taabtaan sankiisa.

4. Gaanjada ku wada riix

Naloxone waxay shaqada ku bilaabaysaa 2 - 3 daqiiqo.



Qof walba wuxuu mudan yahay inuu noolaado,
qof walbana wuxuu noqon karaa saaxiibka nolosha

Xog badan ka ogow [WAFriendsForLife.com](https://www.WAFriendsForLife.com).

